



SoDMA

2022
to
2023

Newsletter | Issue 001 November 2023



1. Regulation of administrative processes and construction of the headquarters of the agency
[>> P.6](#)



2. Disaster Management and Risk Reduction
[>> 8](#)



3. Emergency preparedness and response [>> P.10](#)



4. Leading And Coordinating Humanitarian Affairs of the Country [>>12](#)



Achievements of the Somali Disaster Management Agency

[Message from the Chairman >> P.4](#)





Contents



MESSAGE FROM THE CHAIRMAN **P.4**

INTRODUCTION **P.5**

1. REGULATION OF ADMINISTRATIVE PROCESSES AND CONSTRUCTION OF THE HEADQUARTERS OF THE AGENCY **P.6**
2. DISASTER MANAGEMENT AND RISK REDUCTION **P.8**
3. EMERGENCY PREPAREDNESS AND RESPONSE **P.10**
4. LEADING AND COORDINATING HUMANITARIAN AFFAIRS OF THE COUNTRY **P.12**





Message from the Chairman

First of all, all thanks belong to the Almighty Allah, who does everything according to His will. Thereafter, I would like to thank the President of the Federal Republic of Somalia, H.E. Dr. Hassan Sheikh Mohamud, and the Prime Minister of the Government of the Federal Republic of Somalia, H.E. Hamza Abdi Barre, who came with a mature view of strengthening humanitarian aid activities in the country, which resulted re-operating the Somali Disaster Management Agency (SoDMA) on August 16, 2022.

The re-instatement of the Agency came at a time when the Somali nation was dealing with various problems caused by; the recurring drought, floods, desert locusts and storms which have hit some Somali areas, and there has been a long period of security instability and explosions organized by the extremist groups of the Kharijites (Al Shabaab).

It also came at a time when there was a fear of famine in the country after the severe drought that started at the end of 2021, which affected approximately 7.8 million people in the Somali community and millions of livestock they depended on resulting in widespread displacement of up to 1 million people.

However, as soon as it was reactivated, the agency began to provide emergency aid to the Somali people who were in dire need of humanitarian aid, and after a great effort, humanitarian aid was delivered to 85% of the areas and people affected by the drought, which led to avoid the dreaded famine situation.

We have also provided humanitarian aid to more than 20 areas that have been liberated from the Kharijites. Additionally,

SoDMA provided immediate relief and assistance to all the victims of the explosions organized by Al-Shabab in the Benadir region and other Federal Member States, providing effective assistance to the relatives and families of those who were martyred in the explosions, especially the Zoobe-2 explosion, on October 29, 2022, and we facilitated to take the serious injuries that cannot be treated in the country abroad for treatment.

All this and more, it has been implemented with the help of God and the efforts of the government aided by the governments of our brotherly and international friends. A great role has also been played by the employees, staff, volunteers and experts of the SoDMA Agency who are tirelessly day and night to perform the national duties entrusted to us as we are determined to fulfill our duty of excellence and accelerating disaster management and humanitarian assistance activities in the country with a focus on overcoming vulnerability to hazards and strengthening recovery and achieving disaster-resilient living standards.

In conclusion, I would like to thank all the Somali people in the country and abroad, the Federal Government, the Federal Member States, and various international and national organizations that have supported us in fulfilling our national duties.

Thank you all
Mr. Mohamud Moalim Abdullahi
Chairman of the Somali Disaster Management Agency



INTRODUCTION

The Somali Disaster Management Agency (SoDMA) was established on August 3, 2011, after the severe drought that hit the country, which resulted in the displacement of tens of thousands of families, who flocked to the big cities having no shelter, food, water and medicine. The official announcement of the foundation of the Agency came after the cabinet's decision to pass it and the Presidential Decree, and it was approved by the Somali Federal Parliament, by the law no. 17, on 27/06/2016.

Between April 2017 and July 2022, the organization was part of the Ministry of Humanitarian Affairs and Disaster Management of the Federal Government of Somalia. However, the Somali Disaster Management Agency (SoDMA) was rapidly reactivated on 17/08/2022, after the dissolution of the Ministry to deal with the difficult humanitarian situation in the country as a result of the lack of rains for several consecutive seasons and the severe drought that the country faced at end of 2021.

After the re-instatement of the Somali Disaster Management Agency (SoDMA), it succeeded in accelerating the national disaster management and emergency response to humanitarian issues in the country. The efforts of the Somali government to save the country from the dreaded famine have been successful, without forgetting the efforts of donors and humanitarian aid organizations operating in the country.

So, we will share with you the report on the performance of the Agency for the year 2022/2023, which consists of four pillars that are central to the vision and goal of the Agency namely:

1. Regulation of the administrative process and the construction of the Headquarters of the Agency.
2. Disaster Management and Risk Reduction.
3. Emergency Preparedness and Response.
4. Leading and coordinating humanitarian affairs of the country.

After the re-instatement of the Somali Disaster Management Agency (SoDMA), it succeeded in accelerating the national disaster management and emergency response to humanitarian issues in the country. The efforts of the Somali government to save the country from the dreaded famine have been successful, without forgetting the efforts of donors and humanitarian aid organizations operating in the country.





1. REGULATION OF ADMINISTRATIVE PROCESSES AND CONSTRUCTION OF THE HEADQUARTERS OF THE AGENCY

New Institutional Structure & Completion of Work Definition of Departments and Heads of Departments.

After the re-operation of the Agency, it took action to create a process and structure suitable for the work and duties assigned to the Agency, and experts with extensive knowledge and experience were assigned to this task as they prepared a comprehensive structure for the Agency's Key departments and divisions. Also, the experts have prepared the work structure of the departments and the Heads of departments defining the work of each and every individual.

Deployment of SoDMA Agency Staff

Upon completion of the process of establishing the Agency's administration and the staff's work definition, all the employees of the Agency were deployed and were assigned to diverse duties based on suitability, experience and knowledge, while maintaining the process

of observation, supervision, consistency and work performance. Also, the Agency deployed experts and consultants who became the backbone in the implementation of the goal and vision of the Agency.

Construction of the Agency's Headquarters & Equipment

The establishment of a headquarters in a short period of time was a great success that was made possible by the long efforts and dedication of the leadership of SoDMA, and we are grateful to the UNDP organization that assisted the Agency in constructing the headquarters to a high standard and equipping it with all the necessary equipment to carry out the duties of the agency. We are also very grateful to UNICEF, which has played a significant role in equipping the center with computers and laptops, printers and video conference equipment.

On the first anniversary of the Agency's revival, which coincided with 16/8/2023, the Deputy Prime Minister of the Federal Government of Somalia, Mr. Salah Jama,

inaugurated the headquarters.

Training and improving the quality of staff of the Agency

The agency focused on training and improving the professional skills and academic experience of its employees, and during the one-year period that the agency was working, 12 important training and workshops were held for 259 employees of the Agency, who were trained on various topics related to:

- Connecting and coordination of humanitarian affairs
- Risk reduction and disaster management processes
- Emergency response
- Disaster resilience and recovery
- Assessing the needs of vulnerable people
- Analysis of drought and food security data
- Participation of women in leadership in responding to humanitarian situations
- Warning against mass hazards
- Studies related to climate change and



- its impact on disasters
- Monitoring and evaluation of projects
- And many other topics

Preparing the Agency's Five Year Strategy

The agency has taken a special responsibility to find a comprehensive plan to guide the activities of the agency, spending time to prepare the strategy of the Five Year plan (2023-2027), making it the first time that the Agency prepares a strategic plan, to aim and implement the mission and the programs that are of priority and have been entrusted to the Agency. This strategy focuses on:

- Preparing and establishing all legal procedures and guidelines for the Agency's activities
- Humanitarian aid operations
 - Urgent Emergency
 - Implementation of Disaster Recovery and Resilience Projects
 - Finding solutions for IDPs
 - Establishing a monitoring and evaluation process for projects



The agency has taken a special responsibility to find a comprehensive plan to guide the activities of the agency, spending time to prepare the strategy of the Five Year plan (2023-2027), making it the first time that the Agency prepares a strategic plan, to aim and implement the mission and the programs that are of priority and have been entrusted to the Agency.



This strategy is the backbone of the disaster management process and the safety of the Somali community and it featured the Ministries of Humanitarian Affairs and Disaster Management of the Regional Governments and Banadir Region.

2. DISASTER MANAGEMENT AND RISK REDUCTION

Famine Prevention, Drought and Flood Relief, and Stabilization of Liberated areas

Below average rainfall for four consecutive rainy seasons caused a severe drought that affected more than 7.8 million people and millions of livestock, leading to the widespread displacement of up to 1 million people. The agency has provided large-scale relief to the areas affected by the drought. It has succeeded in implementing massive relief effort that played a major role in preventing the threat of famine in the country.

The Agency has also provided emergency aid to the areas affected by the floods especially areas and districts in Hirshabelle and Jubbaland States.

The agency played a significant role in the stabilization program by providing humanitarian aid to more than 20 areas that were liberated from the Kharijites.

The aid provided by the agency includes; aid provided directly by the agency and aid provided in cooperation with humanitarian agencies and organizations.

A. THE TOTAL NUMBER OF OTHER AGENCIES AND ORGANIZATIONS WE COOPERATED WITH

| Agencies and Organizations | Number of Households | Population |
|------------------------------|----------------------|------------|
| King Salman Humanitarian Aid | 66,000 | 396,000 |
| Qatar Charity | 96,600 | 579,600 |
| IHH (Turkish NGO) | 106,000 | 636,000 |
| Total | 268,600 | 1,611,600 |

B. TOTAL AID FROM SODMA AGENCY

| Number of Households | Population |
|----------------------|------------|
| 119,180 | 715,080 |

Implementation of the Udhiya sacrifice program of the year 2023

The SoDMA Agency with the help of its partner Agencies and organizations operating in the country was able to implement



the Udhiya sacrifice program of this year, which was carried out in the Banadir region and the Federal Member States, and benefited the number of people mentioned in the table below:

TOTAL NUMBER OF PEOPLE WHO BENEFITED FROM THE UDHIYA PROGRAM IN THE YEAR 2023


| Number of Households | Number of People |
|----------------------|------------------|
| 39,166 | 235,000 |


Easing the tax exemption for humanitarian aid donations

SoDMA has succeeded in simplifying the process of tax exemption for humanitarian aid donations which have been a problem for the aid agencies working in the country, and during the past year, it has exempted taxes on 28,948.36 metric tons of aid donations that the aid agencies brought to the port of Mogadishu.

Warning against mass hazards

In line with the duty of the Agency to give warnings of risks and dangerous situations, it collects reports on dangerous situations in the country on a daily, weekly and monthly basis, and also anticipates upcoming threats, keeping an eye on the dangers at that time. Therefore, the Agency has issued various warnings about; Floods, droughts, sea waves and strong winds that were threatening many areas of the country, these warnings have enabled the community to wake up in good time and be very careful, which has reduced the possible loss of life and property.





The preparation of a national strategy for the warning system of mass hazards

In order to reduce disasters in the country and save lives and property, the Agency is working on the preparation of a national strategy for the mass hazard warning system that enables individuals, communities, businesses and the government to take timely preventive measures to reduce the risk of disaster before it occurs.

Establishing a National Forum on Disaster Risk Reduction

In order to create a unified system to reduce disasters in the country, and to save lives and property, it was necessary to create a National Disaster Risk Reduction Forum which is involved in the preparation of guidelines and plans for the forum.


Pictures



In line with the duty of the Agency to give warnings of risks and dangerous situations, it collects reports on dangerous situations in the country on a daily, weekly and monthly basis, and also anticipates upcoming threats, keeping an eye on the dangers at that

Preparation of a National Strategy for Disaster Risk Reduction

In order to reduce the number of disasters that occur in the country, and increase resilience to disasters, the Somali Disaster Management Agency is in the final stages of preparing the National Strategy for Disaster Risk Reduction which will make it easier for the community to be resilient to disasters.



3. EMERGENCY PREPAREDNESS AND RESPONSE



Operationalize National Emergency Operation Center

In order to manage emergencies and save lives and property of the Somali citizens, the Disaster Management Agency has equipped and operated the National Emergency Operation Center. The center is ready to expand emergency services in the country.

Zoobe 2 Explosion Disaster Emergency (10/29/2022)

The Somali Disaster Management Agency (SoDMA) has made extensive efforts to provide relief to the victims of the zoobe 2 bombings, as the agency has urgently prepared temporary centers to facilitate the Somali citizens who donated blood to their brothers and sisters in crisis helping the victims and their families.

The Agency succeeded in mobilizing the Somali people by collecting funds for the relief of the victims of the Zoobe 2 explosion.

The funds collected were distributed to the; orphans and relatives of those who died, those who were injured and citizens whose property was destroyed in the Zoobe 2 explosion, while the rest of the funds was used to build a trauma center for emergency care at Madina Hospital and was inaugurated by the Prime Minister of the Federal Republic of Somalia Mr. Hamza Abdi Barre and a hospital will be built in Madina.

The aid expanded to the victims of the Zoobe 2 explosion

1. FAMILIES THAT HAVE BEEN ASSISTED

| Injuries | Total injuries | Total number of new injuries paid | Per person | Total number of families assisted |
|---------------------------------------|------------------------|-----------------------------------|------------|-----------------------------------|
| Total number of injuries | 334 | 28 | \$500 | 28 |
| Total number of injuries taken abroad | 11 | 9 | \$2000 | 9 |
| Deaths | Total number of deaths | Total number of deaths paid | Per person | Total number of families assisted |
| Total deaths | 119 | 113 | \$1000 | 113 |

2. THE ORPHANS ASSISTED

| Gender | Number Of Orphans Assisted |
|--------------|----------------------------|
| Male | 128 |
| Female | 133 |
| Totan Number | 261 |

3. BUSINESSMEN ASSISTED

| Gender | Number Of Businessmen |
|--------------|-----------------------|
| Men | 77 |
| Female | 17 |
| Total Number | 94 |

Explosion Emergency (Baladweyne, Buulo Burde, Jalalaqsi, Mahaas, Bardhere and Garbahaarey)

The Somali Disaster Management Agency (SoDMA) has organized a large-scale facilitation for the victims of the explosions in Baladweyn, Buulo Burde, Jalalaqsi, Mahaas and Bardhere who were taken to Mogadishu for special treatment.

| NO | City/Town | Number of Victims |
|--------------|-------------|-------------------|
| 1 | Baladweyne | 21 |
| 2 | Mahaas | 32 |
| 3 | Buulo Burde | 7 |
| 4 | Jalalaqsi | 7 |
| 5 | Garbahaarey | 10 |
| 6 | Baardheere | 13 |
| Total Number | | 90 Victims |

Lasa'anod Emergency Crisis

The Somali Disaster Management Agency (SoDMA) provided immediate assistance to the people who were affected by the Lasa'anod disaster as the agency quickly sent planes to pick up the injuries and also sent aid shipments by plane and boat.

| NO | Type of Aid | Total Number |
|----|------------------------|--------------|
| 1 | Injury Transportations | 185 Injuries |
| 2 | Medicine | 21 Tones |
| 3 | Food Relief | 345 Tones |

Laying foundation stones for Emergency Operations Centers of the State Governments

In order to manage emergency situations, the Disaster Management Agency (SoDMA) has established all the Emergency Operations Centers of the Federal Member States of the country.

Laying foundation stone of Care Centers for injuries requiring emergency care


In order for the patients affected by disasters to receive better care and to save their lives, the Somali Disaster



Management Agency succeeded in laying the foundation stone for the largest Care Center for injuries in need of emergency care. The foundation stone of the center was laid down by the Prime Minister of the Federal Republic of Somalia, Mr. Hamza Abdi Barre.



4. LEADING AND COORDINATING HUMANITARIAN AFFAIRS OF THE COUNTRY



Humanitarian Affairs Relations Forum

The agency managed to hold the Humanitarian Affairs Forum meeting which is a gathering that brings together; SoDMA, some Federal Government Ministries, Ministries of Human Affairs and Disaster Management of the Regional Governments, Banadir Region, Donors, International and national organizations, this meeting is held quarterly to discuss the humanitarian situation in the country at the time. The organization held three meetings during the first year of re-operation, two of which were held in Mogadishu and chaired by the Deputy Prime Minister of the Federal Republic of Somalia, Mr. Salah Ahmed Jama, while the third meeting was held in Kismayo and was chaired by the President of Jubbaland State, Mr. Ahmed Mohamed Islam. These meetings focused on how to respond to droughts, floods and relief for the people living in the areas liberated from the Kharijites and those who have been displaced. It was also generally discussed on how to deal with the humanitarian situation in the country, and how to create plans that can lead to overcome the stages of vulnerability to disasters and reach the level of resilience and development of community life.

Strengthening the cooperation relationship between SoDMA and the Ministries of Human

Affairs and Disaster Management of the Regional Governments and Banadir Region

The Agency has enhanced its relationship and cooperation with the Ministries of Human Affairs and Disaster Management of the regional governments and Banadir Region, by holding regular consultation meetings to obtain a unified perspective on the process of disaster management and humanitarian aid issues in the country, agreeing to hold the meeting of the Humanitarian Affairs Forum and establishing a unified policy on the government's monitoring and follow-up on plans and projects related to disaster management and relief activities in the country.

SoDMA's Participation in Worldwide International Disaster Management

Representing the Federal Government of Somalia and carrying out its national mandate for disaster management, the SoDMA Agency has participated in international conferences organized by governments, international organizations and regional organizations which were held in;

- UN-GENEVA
- IGAD-NAIROBI
- FOA-ROME
- ARC-Addis Ababa
- ARC-LOME

- Arab league-Cairo
- SoDMA Chairman's delegation Visit-Turkey
- UNDRR-Sharm El-Sheikh

Conclusion and Acknowledgments

SoDMA has made great efforts in ensuring the national goals of disaster management and emergency relief and humanitarian aid in the country, and is committed to double its efforts towards saving the Somali people and creating a situation that can lead to overcome difficulties and move towards a life that can withstand and defend against disasters of all kinds.

Finally, the Agency is grateful to everyone who contributed to its significant achievements in the past year. In particular, we mention below the Governments and Institutions/Organizations that supported us to achieve this great volume of success in the year August 2022- August 2023:

Governments

- United Arab Emirates (UAE)
- China
- Egypt
- Saudi Arabia
- Qatar
- Serbia

Unions

- African Union
- IGAD
- ARC (African Risk Capacity)
- OIC (Organization of Islamic Cooperation)

Organizations

- UNDP
- Qatar Charity
- WFP
- UNICEF
- King Salman Humanitarian Aid and Relief Center
- Save the Children
- IHH
- FOA
- OXFAM
- World Vision
- IMC
- Gift of the Givers
- UNFPA









Achievements 2022 - 2023





SoDMA

2022
to
2023

Newsletter | Issue 001 November 2023



**1. Nidaaminta
Hanaanka
Maamulka
Iyo Dhismaha
Xarunta Dhexe Ee
Hay'adda**

>> P.22



**2. Maareynta
Masiibooyinka
Iyo Yareynta
Khataraha >> 24**



**3. U Diyaargarowga
Iyo Ka Jawaabista
Xaaladaha
Degdega >> P.26**



**4. Hogaaminta Iyo
Isku-Dabaridka
Xiriirka Arimaha
Bini'aadanimada
Dalkay >>28**



**Warbixninta wax
qabadka Hay'adda
Maareeynta
Masiibooyinka
Soomaaliyeed**

Fariinta Gudoomiyaha >> P.20





Contents



FARIINTA GUDOOMIYAHA **P.20**

HORUDHAC **P.21**

1. NIDAAMINTA HANAANKA MAAMULKA IYO
DHISMaha XARUNTA DHEXE EE HAY'ADDA
P.22

2. MAAREYNTA MASIIBOYINKA IYO
YAREYNTA KHATARAHA **P.24**

3. U DIYAARGAROWGA IYO KA JAWAABISTA
XAALADAHA DEGDEGA **P.26**

4. HOGAAMINTA IYO ISKU-DABARIDKA
XIRIIRKA ARIMAHA BINI'AADANIMADA
DALKA **P.28**





Fariinta Gudoomiyaha

Ugu horeyn, Mahadnaq dhamaanteed waxay u sugnaatay Allah Subxanahu Watacalaa, oo wax walbaahi doonistiisa ku qabsoomaan. Marka xigta waxaan u mahadcelinayaa Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliyeed Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud, iyo Raysulwasaaraha Xukumadda Jamhuuriyadda Federaalka Somaliyeed Mudane Xamsa Cabdi Barre oo la yimid aragti bisil oo ku aadan xoojinta hawlaha gargaarka bani'aadanimo ee dalka, taasoo ay ka dhalatay in ay dib u hawlgaliyaan Agoosto 16, 2022 Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Soomaliyeed (SoDMA).

Dib u hawlgalinta Hay'adda ayaa timid xilli ay umadda Soomaaliyeed la tacaalaysay dhibaatooyin kala duwan oo ay sababeen; Abaarta soo noqnototay, fatahaadaha, anyaxa saxaraha iyo dabeello ku dhuftay qaar kamid deeganada Soomaaliyeed, ayna usii dheerayd xasillooni darro amni iyo qaraxyo oo ay soo abaabulayeen kooxaha xagjirka ah ee Khawaarijta Al shabaab.

Waxaa kale oo ay kusoo beegantay waqti laga cabsi qabay in ay dalka ka dhacdo macaluul kadib abaartii saf marka ahayd oo soo bilaabtay dhamaadkii sanadka 2021, taasoo saameysay tiro gaaraysa ku dhawaad 7.8 Malyan qof oo kamid ah bulshada Soomaaliyeed iyo malaayiin xoolaha ay ku tiirsanyihiin, taasoo ay ka dhasheen barakac baahsan oo gaaraya ilaa 1 Million qof.

Hasayeeshee, islamarkii dib loo howlgaliyay Hay'addu waxay bilowday gurmd deg dega in la gaarsiyo dadkii Soomaaliyeed ee kaalmada bani' aadanimo sida degf dega ugu baahnaa, waxaana dadaal baaxad leh kadib la gaarsiiyay gargaar bani'aadanimo ilaa 85% deegaanada iyo dadka ay saamaysay abaarta taasoo sabab u noqotay in laga baaqsado xaaladii macaluusha ee laga cabsi qabay.

Sidoo kale waxaan gargaar bani'adamno gaarsiinay in ka badan 20 deegaan oo kamid ah deegaanadii laga xoreeyay

argagaxisada khawaarijta. ayadoo sidoo kale aanu gurmad iyo gargaar deg deg ah u fudinay dhamaan dhaacawcyadii ka dhashay qaraxyadii ay soo abaabulayn khawaarijta AL-shabab ee ka dhacay gobolka Benadir iyo qaar ka mid ah dowlad goboleedyada, anaga oo sidoo kale kaalmo wax ku ool ah gaarsiinay eheladii iyo qoyskii marxuumiintii ku dhintay qaraxyadaas, gaar ahaan qaraxii zoobe2, ee October 29, 2022. waxaana ka shaqaynay inaan dalka dibaddiisa u qaadnay dhawacyada halista ah ee aan lagu daawayn karin wadanka gudihiisa.


Intaani iyo in kabadanba, waxa ay ku hirgashay tawfiiqda Alle iyo dadaalka Dawladda oo kaashanaysa dawladaha aan walaalaha nahay iyo kuwa aan saaxiibada nahay. Waxaa kaloo kaalin weyn ka qaatay shaqaalaha, howlwadeenada, mutadawiciinta iyo khubarada Hay'adda SoDMA oo habeen iyo maalin u taagan gudashada waajibaadka qaran ee naloo loo igamday iyadoo ay naga go'antahay inaan si hagar la'aan ah u oofino xilka naga saaran sare uqaaddida iyo dardargelinta hawlaha maareynta masiibooyinka iyo gargaarka Bani'aadamnimada ee dalka anagoo diiradda saarayna sidii looga gudbi lahaa u unuglaanshaha khatarah loona adkayn lahaa soo kabashada iyo in la gaaro heerarka noloshu ee u adkaysiga afooyinka .

Gabagabadii, waxaan u mahadcelinaya dhamaan Shacabka Soomaliyeed ee gudaha iyo dibada jooga, Dowladda Federaalka, Dowlad Goboleedyada, iyo hay'adaha kala duwan ee caalimiga ah iyo kuwa wadaniga ah ee nagu gacansiiyay gudashada waajibaadkeena qaran.

Mahadsanidiin
Mudane: Maxamuud Macalin Cabdullahi



En Shiddo



Kadib markii dib loo hawlgaliyay Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Soomaaliyeed (SoDMA), waxa ay ku guuleysatay dardar galinta shaqada qaran ee maareynta masiibooyinka iyo ka jawaabista degdega ah ee arrimaha bani'aadamnimo ee dalka. Waxana guulaystay dadaalkii dawladda Soomaaliyeed eek u aadanaa in dalka laga badbaadiyo macluushii laga cabsi qabay in ay dhacdo. Iyadoo aan la hilmaami karin dadaalka deeq bixiyayaasha iyo hay'daha ka shaqeeya gargaarka bani'aadanimo ee dalka ka hawlgala.

HORUDHAC

Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Soomaaliyeed (SoDMA) Waxaa la aasaasay Agoosto 03.2011, kadib Marki ay dhacday Abaartii ku dhufatay dalka soomaaliya, taasoo keentay in ay kasoo barakacaan deegaanadooda tobanaan kun oo qoys, Kuwaas oo si xoog leh ugu soo qulqulay Magaalooyinka waaweeyn ee dalka, ayaga oo aanan haysan; hooy, cunno, biyo iyo daawo. Waxayna faafinta rasmiga ee aaska hay'addu soo baxday kadib go'aankii golaha wasiirada iyo Dekreeto Madaxwayne, Waxaana ansixiyay baarlamaanka federalka soomaaliyeed, ayaga oo ku ansixay sharci Ir 17, sharcigaas oo soo baxay 27/06/2016.

Inta u dhaxeysay Abriil 2017- Luulyo 2022 waxa ay hay'addu qeyb ka ahayd Wasaaraddii Gargaarka iyo Maareynta Masiibooyinka ee XFS. Haseyeeshee, waxaa dib loo howlgaliyay Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Soomaaliyeed (SoDMA) 17/08/2022, kadib markii la baabi'yay Wasaaraddii si wax looga qabto xaaladda Bani'addanimo ee adag ee dalka ka jirta taasoo ka dhalatay roobabkii oo yaraaday dhawr xilli roobaad oo is xigxigta waxaana dalka soo wajahday abaar ba'an dhamaadkii sandadii 2021, waana midda keenatay in si deg dea loo hawl galiyay iyadoo aan la helin xadigii roobabka loo baahnaa.

Kadib markii dib loo hawlgaliyay Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Soomaaliyeed (SoDMA), waxa ay ku guuleysatay dardar galinta shaqada qaran ee maareynta masiibooyinka iyo ka jawaabista degdega ah ee arrimaha bani'aadamnimo ee dalka. Waxana guulaystay dadaalkii dawladda Soomaaliyeed eek u aadanaa in dalka laga badbaadiyo macluushii laga cabsi qabay in ay dhacdo. Iyadoo aan la hilmaami karin dadaalka deeq bixiyayaasha iyo hay'daha ka shaqeeya gargaarka bani'aadanimo ee dalka ka hawlgala.

Hadaba, waxaan halkaan idiinkula wadaageeyna warbixinta waxqabadka Hay'adda ee Sanadka 2022/2023, oo ka kooban afar tiir oo udub dhexaad u ah Hiigsiga iyo yoolka Hay'adda. kuwaas oo kala ah:

1. Nidaaminta habka maamulka iyo dhismaha Xarunta dhexe ee Hay'adda.
2. Maareynta Masiibooyinka iyo Yareynta Khataraha.
3. U diyaargarowga iyo Ka jawaabista Xaaladaha Deg dega
4. Hogaaminta iyo isku-dabaridka arimaha bini'aadanimada dalka.



1. NIDAAMINTA HANAANKA MAAMULKA IYO DHISMAHA XARUNTA DHEXE EE HAY'ADDA

Qaab-dhismeedka Cusub ee Hay'adda & Dhamaystirka Shaqo Qeexista Waaxyada iyo Madax Qaybeydada.

Kadib markii dib loo hawlgaliyay Hay'adda waxay ku talaabsatay sidii loo samayn lahaa hanaan iyo qaabdhismeyd ku haboon howsha iyo waajibaadka loo igmaday Hay'adda, waxaana loo xilsaaray hawshan khubaro aqoon iyo waayo arganimo durugsan u leh iyagoo u diyaariyay Hay'adda qaabdhismeed koobaya dhamaan Waaxyaha iyo madax qaybeedyada muhiimka u ah. Sidoo kale, waxa ay khuburadu diyaariyeen hawltimaameedka waaxyaha iyo Madaxqaybeedyada hoos taga waax waliba ayaga oo qeexay cid kasta howsha ay qabanayso.

Hawlgalinta Shaqaalaha Hay'adda SoDMA

Markii la dhamaysitray hanaanka dhismaha maamulka hay'adda iyo howltimaameedka shaqaalaha, waxaa la hawlgaliyay dhamaan Shaqaalaha

Hay'adda, kuwaas oo lagu meeleeeyay cidwalba howshii loo igmaday taasoo lagu saleeyay ku haboonaansho, khibrad iyo aqoon, ayada oo la ilaalay hanaanka goobjoogidda, kormeerka, joogtaynta iyo howlgudashada shaqo. sidoo kale, hay'adda waxay hawlgalisay khubaro iyo lataliyayaal kuwaas oo laf dhabar u noqday hirgalinta yoolka iyo hiigsiga Hay'adda.

Dhismaha Xarunta Dhexe ee Hay'adda & Qalabaynteeda

In muddo kooban lagu hirgaliyo xarun dhexe oo hay'addu ku shaqayso waxay ahayd guul weyn oo ku suuragashay dadaal dheer iyo juhdi badan oo ay bixiyeen hogaanka sare ee hay'adda, waxaana u mahad celinaynaa hay'adda UNDP oo ka kaalmaysay hay'adda dhismaha iyo qalabaynta xarunta dhexe, taasoo loo dhisay si heer sare ah laguna qalabeeyay dhamaan agabka lagama maarmaanka u ah gudashada waajibaadka shaqo ee hay'adda. Waxaa kaloo mahad balaadhan u celinaynaa hay'adda UNICEF oo kaalin laxaad leh ka qaadatay qalabaynta

xarunta ee dhanka kompiyutarada iyo laabtoobyada, daabacadaha iyo qalabka fududeeya shirarka (video conference).

Sanadguuradii dib uhawlgalinta hay'adda oo ku beegnayd 16/8/2023 ayaa waxaa xarunta dhexe xadhiga ka jaray Raysulwasaare kuxigeenka XFS Mudane Saalax Jaamac.

Tababaridda iyo sare uqaadidda tayada Shaqaalaha hay'adda

Hay'addu waxay xooga saartay tababaridda iyo sare u qaadidda xirfadda shaqo iyo khibrada aqooneed ee shaqaalaha hay'adda, waxaana muddadii halka sano ahayd oo ay hay'adda shaqaynasay shaqaalaha loo qabtay 12 (labo iyo taban) tababar iyo aqoon isweydaarsi oo ay ka faa'iideystay 259 qof oo ka tirsan shaqaalaha Hay'adda, kuwaas oo lagu baranayay mawaadiic kala duwan oo la xiriira:

- Isku xirka iyo iskudubaridka Arrimaha baniadamanimda
- Hanaanka yareynta khataraha iyo maareynta Masiibooyinka



- Ka jawaabista iyo gurmadka degdega ah
- U adkeysiga aafuoyinka iyo kasookabashada dhibaatooyinka.
- Qiimayanta baahayaha bulshada nugul.
- Falanqaynta xogaha abaaraha iyo sugnaanta cuntada.
- Ka qaybqaadashada haweenka hogaanka-maamul ee ka jawaabista xaaladaha Bani'aadamnimo
- Ka digista halis-wadareedyada.
- Daraasadaha la xidhiidha isbedelka cimilada iyo samaynta ay ku leeyihiin masiibooyinka
- Dabalgalka iyo qiimeynta mashaariicda.
- iyo mawadiic kale oo fara badan.

Diyaarinta Istaratijiyada Shanta sanno ee Hay'adda

Hay'addu waxa ay xil gaar ah iska saartay sidii loo heli lahaa qorshe dhamaystiran oo lagu hago howlaha hay'adda, iyada oo waqti ku bixisay sidii loo diyaarin lahaa istiraatiijiyada qorshaha Shanta Sano (2023-2027), taasoo noqonaysa markii ugu horeeysay oo ay hay'adda diyaariso qorshe istiraatiijiyadeed, si ay u hiigsato una hirgaliso himilada iyo barnaamijyada hortabinta u leh hay'adda ee loo igmaday. waxa ayna istiraatiijaydaan xooga saareysaa:

- Diyaarinta iyo dejinta dhamaan habraacyada Sharciyeed iyo Hagayaasha Howlaha hortabinta u leh Hay'adda.
 - Howlaha gargaarka bi-ni'aadanimo.
 - Gurmadka degdega
 - Hirgalinta Mashaariicda soo kabashada iyo U adkeysiga aafuoyinka
 - Xal u helidda Barakacayaasha
 - Dajinta habka dabagalka iyo qiimeynta mashaariicda.

Hay'addu waxa ay xil gaar ah iska saartay sidii loo heli lahaa qorshe dhamaystiran oo lagu hago howlaha hay'adda, iyada oo waqti ku bixisay sidii loo diyaarin lahaa istiraatiijiyada qorshaha Shanta Sano (2023-2027), taasoo noqonaysa markii ugu horeeysay oo ay hay'adda diyaariso qorshe istiraatiijiyadeed, si ay u hiigsato una hirgaliso himilada iyo barnaamijyada hortabinta u leh hay'adda ee loo igmaday. waxa ayna istiraatiijaydaan xooga saareysaa

Istiraatiijidaan waxa ay laf dhabar u tahay haanaanka maareeynta masiibooyinka iyo badqabka bulshada soomaaliyeed waxaana qeyb ka ah Wasaaradaha Gargaarka iyo Maareeynta Masiibooyinka ee Dowlad Goboleedyada iyo Gobol-



2. MAAREYNTA MASIIBOYINKA IYO YAREYNTA KHATARAHA

Ka hortaga Macluusha, Gurmada Abaaraha, Gargaarka Fatahaadaha iyo Xasilinta Goobihii la xoreeyay.

Kadib roobabkii yaraaday afar xilli roobaad oo isxigay waxay sababtay abaar daran taasoo saamaysay in ka badan 7.8 Malyan oo qof iyo malaayin xoola ah, taasoo horseeday barakac baahsan oo gaarayo ilaa 1 Mllion qof. Hay'addu waxay gurmada balaaran gaarsiisay deegaanadii ay abaartu saameysay. Waxayna hay'adu ku guuleeysatay fulinta gurmada balaaran oo door weyn ka qaatay in laga hortago halistii macluusha ee dalku qarka u saaraa.

Sidoo kale Hay'adu waxay gurmada degdega ah gaarsiisay deegaanadii ay saameysay fatahaaduhu qaar kamid ah deegaanada iyo degmooyinka Dowlad Goboleedyada Hirshabelle iyo Jubbaland.

Hay'addu waxay kaalin mug leh ka qaadatay barnaamijka xasilinta iyada oo gargaarka bani'adamno gaarsiisay in ka badan 20 deegaan oo kamid ah goobihii laga xoreeyay Khawaarijta.

Gargaarka hay'adda ay fulisay wuxuu isugu jiraa gargaar ay hay'adda toos u fulisay iyo gargaar ay iska kaashadeen hey'adaha ka shaqeeya arimaha bini'aadanimada.

A. WADARTA GUUD EE HAY'ADAHA KALE ISKA KAASHADEEN :

| Hay'adda | Tirada qoysaska | Inta Qof |
|-----------------------------|-----------------|---------------|
| Hay'adda King Salman Releif | 66,000 | 396,000 |
| Qatar Charity | 96,600 | 579,600 |
| IHH (Turkish NGO) | 106,000 | 636,000 |
| Wadarta | 268,600 Qoys | 1,611,600 Qof |

B. WADARTA GUUD EE GARGAARKA HAY'ADDA SoDMA

| Tirada Qoysaska | Tirada Qof ahaan |
|-----------------|------------------|
| 119,180 qoys | 715,080 qof |

Fulinta Barnaamijka Adaaxidda Sanadka 2023.

Hay'addu SoDMA iyada oo kaashaneeyso hay'adaha shaqa wadaagta leh ee ka howlgala dalka waxaa u suurtagashay



in ay fuliso barnaamijta adaaxidda sanadkaan, kaasoo laga fuliyay gobolka Banadir iyo Dowlad goboleedyada, waxaana ka faa'iideystay tirada ku xusan shaxdaan hoose

WADARTA DADKA KA FAA'IIDAYSTAY ADAAXIDDA SANADKA 2023

| Tirada Qoysaska | Tirada Qof ahaan |
|-----------------|------------------|
| 39,166 | 235,000 qof |


Fududeynta Canshuur dhaafka deeqaha gargaarka bani'aadanimo


Hay'adda SoDMA waxay ku guulaysatay fududeynta habka canshuur dhaafka loogu sameeyo deeqaha gargaarka bani'aadanmimo taasoo ay dhibaato ku qabeen hay'adaha gargaarka ee dalka ka shaqeeya, waxayna sanadka gudihiisa canshuur dhaaf u sameysay deeq gargaar oo gaadhaysa 28,948.36 mitri tan oo ay hay'adaha gargaarku soo gaadhsiiyeen dekada Muqdishu.

Ka digista halis-Wadareedka dalka

Sida ku cad waajibbaadka hey'adda ee ka digista halisyadda iyo xaaladaha khatarta ah waxay si Maalinle, Asbuucle iyo Bille u aruurisaa warbixinada xaaladaha khatarta ah ee wadanka ka jira, waxayna sidoo kale odoros kabixisaa khataraha kusoo fool leh, iyadoo islamarkaana isha ku haysaa khatarta markaas taagan. Haddaba, Hay'addu waxa ay soo saartay digniino kala duwan oo ku saabsan; Fatahaad, Abaar, Hirarka Badda iyo Dabeylo xoogan oo ku soo wajahnaa deegaano badan oo wadanka ka mid ah, digniinahaas oo u sahashay bulshada in ay xili fiican ku baraarugaan kana

digtoonaadaan, taasoo yareysay qasaaraha ka dhalankaray





oo isku jiray naf iyo maal

Diyaarinta Istiraatiijiyada Qaran ee Yareenta Khataraha Musiibooyinka.

Si loo yareeyo musiibooyinka dalka ka dhaca, loona kordhiyo u adkeeyisiga aafaoyinka waxay Hay'adda Maareeynta Musiibooyinka ku hawlantahay oo meel gabo gabo ah u maraya diyaarinta Istiraatiijiyada Qaran ee Yareynta Khataraha


Musiibooyinka taasoo u fududeen doonta bulshada in ay u adkeeystaan musiibooyinka.

Diyaarinta istiraatiijiyada qaran ee nidaamka ka digista halis wadareedyada

Si loo yareeyo musiibooyinka dalka ka dhaca, loona badbaadiyo naf iyo maalba, Hay'addu waxay ku howlantahay diyaarinta istiraatiijiyada qaran ee nidaamka ka digista halis wadareedyada taasoo u sahleeysa shakhsiyaadka, bulshada, ganacsatada iyo dawladda inay qaadaan tallaabooyin ka hortag ah oo waqtiyeysan si loo yareeyo khatarta musiibada ka hor halista inta aysan dhicin.

Sameeynta Madasha Qaran ee Yareeynta Khataraha Musiibooyinka.

Si loo aburo nidaam mideeysan oo lagu yareeyo musiibooyinka dalka ka dhaca, loona badbaadiyo naf iyo maalba, waxaa lagama maarmaan noqotay in la aburo Madasha Qaran ee Yareeynta Khataraha Musiibooyinka taasoo lagu howlanyahay diyaarinta howl-tilmaameedka iyo qorshaha qabsoomidda madasha.



3. U DIYAARGAROWGA IYO KA JAWAABISTA XAALADAHHA DEGDEGA



Hawlgalinta Xarunta Qaran Ee Gurmada Deg dega (NEOC).

Si loo maareeyo xaaladaha degdega ah, loona badbaadiyo naf iyo maalka bulshada soomaaliyeed, waxay Hay'adda Maareeynta Masiibooyinka qalabaysay islamarkaana hawlgalisay Xarunta Qaran ee Hawlgalladda Gurmada Deg dega (National Emergency Operation Center). Xarunta ayaa diyaar u ah fidinta adeegyada gurmada deg dega ee dalka.

Gurmada Musiibadii Qaraxii Zoobe 2 (29/10/2022)

Hay'adda Mareeynta Musiibooyinka Soomaaliyeed (SoDMA) waxa ay sameysay dadaallo balaaran oo gurmada loogu fidiyay dadkii ku wax yeelobay qaraxii zoobe2, iyadoo hay'addu ay si dag dag ah u diyaarisay xarumo ku meelgaar ah loogu fududeeyay muwaadiinta soomaaliyeed ee dhiigooda ugu deeqay walaalhood dhibaataadu saameysay iyada oo u gurmatay dadkii ku waxyeelobay iyo ehaladooda.

Hay'addu waxay ku guuleysatay abaabulka bulshada soomaaliyeed iyada oo aruurisay dhaqaalihii loogu gurmaday dadkii ku waxyeelobay qaraxii Zoobe2.

Dhaqaalihii la soo uruuriyay waxeey hey'addu gaarsiiyay agoontii iyo eheladdi dadkii ku dhintay, kuwii ku dhaawacmay iyo muwaadiniintii hantidooda ku burburtay qaraxii Zoobe2. Halka dhaqaalihii soo haray lagu dhisay xarunta Xarunta Daryeelka Dhaawacyada u baahan gargaarka degdega (Trauma Center) taasoo uu dhagax dhigay Raysulwasaaraha XFS Mudane Xamsa Cabdi Barre lagana dhisay isbitaal Madiina.

Gargaakii loo fidiyay dadkii ku waxyeelobay Qaraxii Zoobe 2.

1. QOYSASKII WAXYEELADA SOO GAARTAY EE LA CAAWIYAY

| Dhaawacyada | Wadarta Dhaawacyada | Wadarta Dhaawacyada Culus ee Lacagaha la Siiyay | Qofkiiba | Wadarta Qoysaska La Caawiyay |
|--|----------------------------|---|----------|------------------------------|
| Wadarta Dhaawacyada | 334 | 28 | 500\$ | 28 |
| Dhaawacyada Culus ee Diadda loo qaaday | 11 | 9 | 2000\$ | 9 |
| Dhimashada | Wadarta Guud ee Dhimashada | Wadarta Dhimashada ee Lacagaha La Siiyay | Qofkiiba | Wadarta Qoysaska la Caawiyay |
| Wadarta Dhimashada | 119 | 113 | 1000\$ | 113 |

2. AGOONTA WAX LA GAARSIYAY

| AGOONTA | TIRADA |
|-------------------|--------|
| Lab | 128 |
| Dhedig | 133 |
| Tirada Guud ahaan | 261 |

3. GANACSATADA WAX LA GAARSIYAY

| GANACSATADA | TIRADA |
|-------------------|--------|
| Lab | 77 |
| Dhedig | 17 |
| Tirada Guud ahaan | 94 |

Gurmadii Qarxyadii (Baladweyn, Buulo burde, Jalalaqsi, Maxaas, Baardheere iyo Garbohaareey)

Hay'adda Mareeynta Musiibooyinka Soomaliyeed (SoDMA) waxay sameeysay gurmada balaaran oo lagu soo qaaday dhaawacyada qaraxyadii Baladweyn, Buulo burde, Jalalaqsi, Maxaas iyo Baardheere .

| NO | Magaalada | Tirade Buukaanada |
|----|--------------|-------------------|
| 1. | Baladweyne | 21 |
| 2. | Maxaas | 32 |
| 3. | Buulaburde | 7 |
| 4. | Jalalaqsi | 7 |
| 6. | Garbaharey | 10 |
| 7. | Baardheere | 13 |
| | WADARTA GUUD | 90 ukaan |

Gurmadii Dhibaataadii Laascanod

Hay'adda Mareeynta Musiibooyinka Soomaliyeed (SoDMA) waxay gurmada degdeg u fidsay dadkii ku wax yeelobay dhibaataadii laascanood iyada oo hey'addu si dag dag ah u dirtay diyaaraddo lagu soo qaaday dhaawacyadii, sidookale waxay dirtay shixnado gargaar oo lagu qaaday diyaaraddo iyo Doon.

| NO | Nuuga Gargaar | Tirada Guud |
|----|---------------------------|-------------|
| 1. | Soo qaadidda Dhaawacyadda | 185 dhaawac |
| 2. | Dawooyin | 21 Tan |
| 3. | Gargaar raashin | 345 Tan |

Dhagax dhiga Xarumaha Howlgalladda Gurmada DegDeg ee Dowlad goboleedyada.

Iyada oo laga duulayo maareynta xaaladaha degdega ah waxay Hay'adda Maareynta Musiibooyinka (SoDMA) dhagax dhigtay dhamaan Xarumaha Howlgalladda Gurmada DegDeg ah ee Dowlad goboleedyada dalka.

Dhagax dhiga Xarunta Daryeelka Dhaawacyada u baahan gargaarka degdega

Si daryeel wanaagsan ay u helaan bukaanadda ku waxyeeleoba musibooyinka, loona badbaadiyo naftooda,



waxay Hay'adda Maareynta Musiibooyinka ku guuleeysatay dhagax dhiga Xarunta ugu weeyn Daryeelka Dhaawacyada u baahan gargaarka degdega iyada oo uu dhagax dhigay Raii'sulwasaaraha XFS Mudane Xamza Cabdi Barre.



4. HOGAAMINTA IYO ISKU-DABARIDKA XIRIIRKA ARIMAHA BINI'AADANIMADA DALKA



Madasha xiriirka Arriamha Bani'aadmanimada

Hay'adda waxa ay guuleysatay in ay qabato shirka Madasha xiriirka Arrimaha Bani'aadmanimada kaasoo ah shir ay iskugu yimaadaan Hay'adda SoDMA, wasaaradaha qeyb kamid ah xukuumadda federalka, Wasaaradaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka ee dowlad Goboleedyada, Gobolka Banadir, Deeq bixiyaasha, Hay'adaha Caalmiga ah iyo kuwa dalka, shirkaan oo looga arrin sado hadba xaaladdaha bani'aadamnimo ee taagan ayaa sedexdii biloodle ah. Waxayna hay'addu qabatay muddada sanadka ah oo ay shaqaynaysa sedex jeer oo laba kamid ah lagu qabtay Caasimadda Muqdisho uuna shir gudoomiyay Raisulwasaare kuxeenka XFS Mudane Saalax Axmed Jaamac halka midka sedexaadna lagu qabtay Magaalada kismaayo kaas oo Shir gudoomiyay Madaxwaynaha dowlad gobolled Jubbaland Mudane Axmed Maxamed Islaam. Shirkaan ayaa diiradda lagu saaraa sidii looga jawaabi lahaa Abaaraha, fatahaadaha iyo u gurmashada dadka ku nool deegaanada laga xoreeyay Khawaarijta iyo kuwa kasoo barakacay, sidoo kale waxaa looga wada hadlay guud ahaan la tacaalidda xaaladaha bani'aadamnimo ee ka jirta dalka, iyo sidii loo abuuri lahaa qorshayaal keeni kara in laga gudbo marxaladaha u nuglaanshaha masiibooyinka islamarkaana la gaaro heerka u adkaysiga iyo horumarinta noloshu bulshada.

Xoojinta Xiriirka wadashaqeynta ee SoDMA iyo Wasaaradaha Gargaarka iyo Maareynta Masiibooyinka ee Dowlad Goboleedyada iyo Gobolka Banaadir.

Hay'addu waxay sare u qaaday xiriirka iyo wadashaqeynta ay la leedahay Wasaaradaha gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka ee dowlad goboleedyada iyo Gobolka Banaadir, iyadoo layeelatay kulamo wadatashi oo joogta ah si loo helo argati midaysan ee ku aadan hanaanka maareeynta masiibooyinka iyo arimaha gargaarka bani'aadanimada ee dalka, iyada oo la isku waafaqay qabashada shirka Madasha arriamha Bani'aadmanimada iyo dajinta siyaasad mideeyan oo ku aadan hanaanka dawladda ee la socodka iyo dabagalka qorshayaasha iyo mashaariicda la xiriirta maareynta masiibooyinka iyo hawlaha gargaarka ee ka socota guud ahaan dalka.

Ka qaybgalka Hay'adda Madalladda Maareynta Masiibooyinka ee caalamka.

Hay'adda SoDMA oo mataleeyso Dowladda Federaalka Soomaaliyeed, gudaneysana waajibbaadkeeda qaran ee ku aadan Maareynta masiibooyinka ayaa uga qeeyb gashay dalka dibadiisa shirar calami kuwaas oo ay soo qabanqaabiyeen Dowlado, Ururo calami ah iyo kuwo heer gobol ah kuwaasoo lagu qabtay

- UN/GENEVA
- IGAD/NAIROBI
- FOA/ROME
- ARC/Addis ababa
- ARC/LOME
- Arab league/Cairo
- Booqashii Wafdiga Gudoomiyaha SoDMA/Turkiye
- UNDRR/Sharmal sheikh

Gunaanad iyo Mahadcelin.

Hay'adda SoDMA waxay dadaal baaxad leh ku bixisay xaqiijinta himilooyinka qaranka ee maarynta masiibooyink iyo hawlaha gurmada deg deg iyo gargaarka bani'aadanimoo ee dalka, waxaana ka go'an inay sii labajibaarto dadaalka ku wajahan badbaadinta shacabka Soomaaliyeed iyo abuurista xaalad horseedi karta in laga fayoobaado dhibaatooyinka loona gudbo nolol u adkaysan karta iskana difaaci karta masiibooyinka nooc walba ay yihiin.

Ugu danbayn, Waxay hay'addu u mahadcelinaysaa cid wallaba oo gacan ka gaysatay guulaha ay xaqiijisay hay'addu sanadkii la soo dhaafay. Si gaar ah waxaan u xusaynaa Dawladaha iyo Hay'adaha na garab istaagay si loo gaaro waxqabadkaas mugga weyn ee sanadka Agoosto 2022- Agoosto 2023:

Dawladdaha

- Isutaga Imaaraadka Carabta (UAE)
- China
- Masar
- Sacuudi Carabiya
- Qatar
- Seerbiya

Ururada

- African Union
- IGAD
- ARC (African Risk Capacity)
- OIC (Organisation of Islamic Cooperation)
- Hay'adaha
- UNDP
- Qatar Charity
- WFP
- UNICEF
- King Salman
- Save The Children
- IHH
- FOA
- OXFAM
- World Vision
- IMC
- Gift of the Givers
- UNFPA









Achievements 2022 - 2023

